Cawaaqibta ka dhalan karta u hoggaansamid la'aanta Sharciga Caawinta Qoyska

SOMALI

Nofeembar 2018

Australian Government
Department of Education and Training

NSW FAMILY DAY CARE ASSOCIATION INC.

QALABKA MACALINKA DARYEELKA MAALINTA QOYSKA: **Cawaaqibta ka dhalan karta u hoggaansamid la'aanta Sharciga Caawinta Qoyska**

Ilaalinta u hoggaansanaanta

Adeegahaa iyo bixiyeyaasha Daryeelka Maalintii ee Qoyska ee la oggolaaday ayaa maamula Kaalmada Daryeelka Ilmaha iyo Kaalmada Daryeelka Ilmaha ee Dheeriga ah ayaga oo ka wakiil ah qoysaska hoos imaanaya Sharciga Caawinta Qoyska. Waaxda Waxbarashada iyo Tababarka waxaa ay leedahay barnaamijka daacadnimada maaliyadeed si ay u ilaaliso u hoggaansamidda Sharciga Caawinta Qoyska ee adeegaha Daryeelka Maalintii ee Qoyska.

Hadafka laga leeyahay barnaamijka daacadnimada maaliyadeed waa in uu bixiyo hubin iyo kalsoonida ah in maalgelinta Dowladda Oostireeliya ee waxbarashada carruurta yaryar oo tayo leh iyo daryeelka carruurta in loo isticmaalay si caddaalad ah, loona siman yahay ahna ujeeddadii loogu talogalay. Adeegaha iyo barayaasha waxaa ay mas'uul ka yihiin xaqiijinta maaliyadda daryeelka carruurta in si habboon loo maamulay oo loo adeegsaday in lagu caawiyo qoysaska u-qalma kharashka dhabta ah ee daryeelka carruurta runta ah.

Waaxda Waxbarashada iyo Tababarka waxaa ka go'an in ay taageerto adeegaha oona ka hortagto khaladaadka iyo u hoggaansamid la'aanta in ay marka horeba dhacaan.   Buug-gacmeedyo kala duwan, xaashiyo xaqiiqda ku qoran iyo agab hagid kale ayaa la heli karaa si ay ugu taageeraan adeegaha oona barayaasha ay bartaan xirfadaha iyo aqoonta lagama maarmaanka u ah in si sax ah loo maamulo lacag-bixinnada daryeelka ilmaha.

Waxaa sidoo kale jira awooddo iyo qalabyo badan oo lagu aqoonsanayo ka-dibna wax looga qabanayo hab-dhaqannada khiyaannada iyo kuwa u hoggaansanaan-la'aanta ah, oo ay ku jiraan ayada oo loo marayo Nidaamka Kaalmada Daryeelka Ilmaha.

Xogta qarsoodiga ah ee laga helo qof ka warhaya waxqabadyada khiyaannada ama u hoggaansamid-la'aanta ayaa sidoo kale ah il muhiim ah oo laga helo macluumaad.

Maxaa dhacaya haddii Adeegaaga Daryeelka Maalintii ee Qoyska uusan u hoggaansamin Sharciga Caawinta Qoyska?

Adeegaha iyo bixiyeyaasha Daryeelka Maalintii ee Qoyska waxaa ay mas'uul ka yihiin saxnaanta warbixinnada ay sameeyaan barayaasha.

Barayaasha waxaa sidoo kale loo qabsan karaa mas'uuliyadda fal-dambiyeedyo.

Qofka Daacadnimadiisa iyo taariikhdiisa ee u hoggaansamidda sharciga ayaa khuseysa ku habboonaantooda in ay bixiyaan daryeelka ilmaha ama in ay ka shaqeeyaan adeegga daryeelka ilmaha.

Adeegaha iyo bixiyeyaasha Daryeelka Maalintii ee Qoyska ee la oggolaaday ayaa lagu soo rogi karaa ganaaxyo ama ciqaab haddii aysan u hoggaansamin Sharciga Caawinta Qoyska. Ganaaxyada ama ciqaabta suurtagalka ah waxaa ka mid ah:

- dib-u-helidda lacag-bixinnada dheeraadka ah ama gargaarka lacagta daryeelka ilmaha ah ee sida qaldan lagu soo sheegtay
- in shuruudo dheeraad ah lagu soo rogo bixiyaha ama adeegga si ay u ilaaliyaan oggolaanshaha lagu maamulayo Kaalmada Daryeelka Ilmaha
- oggeysiisyada xadgudubyada
- joojinta ama baajinta oggolaanshaha in qoysaska loo maamulo Kaalmada Daryeelka Ilmaha.

Xaaladaha qaar, u hoggaansamid-la'aanta ayaa sidoo kale ah fal-dambiyeed. Tani waxaa ka dhallan kara ciqaabo waaweyn, oo ay ka mid yihiin ganaax iyo/ama xabsi dhigid.

Waaxda Waxbarshada iyo Tababarka waxaa ay daabacdaa macluumaad la xiriira ganaaxidda, joojinta ama baajinta adeegaha iyo bixiyeyaasha ku jira Diiwaanka Tallaabada Fulinta: education.gov.au/child-care-enforcement-action-register. **education.gov.au/child-care-enforcement-action-register**.

Isbeddellada ku dhaca Sharciga

Waxaa jiray isbeddello dhowr ah oo lagu sameeyay Sharciga Caawinta Qoyska si wax looga qabto u-hoggaansamid la'aanta halista ah iyo khiyaannada suurtagalka ah ee qaar ka mid ah Adeegaha Daryeelka Maalintii ee Qoyska.

Isbeddellada waxaa ka mid ah:

- Adeegaha Daryeelka Maalintii ee Carruurta waa in aysan bixin adeeg waxbarasho iyo daryeelka ee gobolka ama dhulka aan ka ahayn haddii lagu oggolaado gobolka hoos imaanaya Sharciga Qaranka ee Adeegaha Daryeelka iyo Waxbarashada.
- Barayaasha Daryeelka Maalintii ee Qoyska ma qaadan karaan Ilmaha Daryeelka Dheeraadka ah ee loogu talogalay ilmahooda ee ah daryeelka uu bixiyaybare kale isla maalinta ay bixiyaan Daryeelka Maalintii ee Qoyska ee loogu talogalay carruurta dadka kale, aan ka ahayn haddii daruufo la cayimay la adeegsan karo mooyaane (tani waxaa loo yaqaanaa 'ilmo is-dhaafsasho'). Isbeddellada cusub ayaa waxaa ay qeexaan xeerarka caddeynta dokumeentiyada ah ee loogu talogalay waxbarashada iyo shaqo ka-reebnaanta waxaa ayna uga baahan yihiin adeegahaa Daryeelka Maalintii ee Qoyska in uu ku diiwaangeliyo macluumaadka Diiwaanka Daruufaha La Cayimay marka ay daryeelayaan ilmaha uu dhalay qof bare ah.

- Kaalmada daryeelka ilmaha laguma bixin karo daryeel halka aan ka jirin mas'uuliyad dhab ah oo lagu bixinayo lacagaha waafaqsan Qabanqaabada U hoggaansamidda Qoraalka ah; daryeelka inta badan ah gaadiidka; Daryeelka Maalintii ee Qoyska ee lagu bixiyay guriga ilmaha ama halka waalidka uu joogo; ama Daryeelka Maalintii ee Qoyska ama Daryeelka Guriga Gudahiisa ah ee ay bixiyaan waalidiinta ama carruurta walaalahooda ah.
- Adeegaha Daryeelka Maalintii ee Qoyska waa in ay had iyo jeer u sheegaan Waaxda Waxbarashada iyo Tababarka goorta ay oggaadaan in hawl-wadeennadooda muhiimka ah, xubnaha shaqaalaha ama baraha Daryeelka Maalintii ee Qoyska lagu soo eedeeyay ama lagu helay fal-dambiyeed halis ah, noqdo masaluf ama la diiday, wax-laga-beddelay ama la baajiyay Samaynta Baaritaanka Carruurta.
- Shuruudaha ku-habboonaanta adag ayaa waxaa lagu dabakhayaa dadka ay khuseyso, oo ay ka mid yihiin codsadayaasha oggolaanshaha adeegga iyo bixiyaha, adeegaha la oggolaaday iyo gaar ahaan shakhsiyaadka la xiriira.
- Adeegaha Daryeelka Maalintii ee Qoyska ma heli karaan Kaalmada Daryeelka Ilmaha ayaga oo ka wakiil ah qoysaska carruurta da'doodu ay tahay 13 sanno ama ka yar ee dhiganaya dugsi sare ama jira 14 ama ka weyn, haddii sida macquulka ah keligooda laga tagi karin, oo uusan jirin qof kaloo weyn oo ilaalinaya, oo ayna jirto duruuf la cayimay.
- Waxaa jira xaddidaadyo cusub oo lagu soo rogay qaddarka daryeelka barayaasha Daryeelka Maalintii ee Qoyska ay siin karaan qaraabada. Carruurta ah kuwo ay dhaleen walaashaa ama walaalkaa, ay ilma adeer/ilmo abti yihiin ama carruurta ay awoowaha ama ayeeyada u yihiin (oo ay ku jiraan carruurta ay dhaleen carruurta carruurtooda) ee baraha Daryeelka Maalintii ee Qoyska waa in ay noqdaan in ka yar boqolkiiba 50 carruurta baraha uu siinayo daryeelka Kaalmada Daryeelka Ilmaha ee gudaha laba toddobaad kasta. Saamigalka ayaa lagu dabakhaa dhammaan carruurta la daryeelo laba toddobaad oo dhan, oo ma aha hal kullan oo kaliya.

Maxay tani aidga kaaga dhigan tahay?

Macluumaad badan oo ku saabsan xirmada daryeelka carruurta cusub waxaa laga heli karaa mareegtada Waaxda Waxbarashada iyo Tababarka: **www.education.gov.au/childcare**.

Qodobada Muhiimka ah

- Dowladdu waxaa ay siisaa gargaarka lacagta daryeelka carruurta qoysaska xaqa u leh ayada oo adeegsanaya Daryeelka Maalintii ee
- Adeegga Daryeelka Maalintii ee Qoyska waxaa saaran waajibaad sharci oo waafaqsan Sharciga Caawinta Qoyska.
- Bixinta diiwaannada imaanshaha adeegaaga oo been-abuur ah waa sharci dejinta.
- Bixinta Daryeelka Maalintii ee Qoyska oo la siiyo carruurta dadka kale isla maalinta ay carruurtaada isticmaalaan Daryeelka Maalintii ee Qoyska, iyo sheegashada Kaalmada Daryeelka Ilmaha, waa sharci-darro aan ka ahayn haddii xaalado la sheegay lagu dabakhi karo mooyaane.
- Ka-warbixinta in aad bixinayso daryeelka ilmaha ee cunugamarka aad keliya ka soo qaadayso iskuulka ka-dibna aad guriga geynayso waa sharci jebin.
- In si ula-kac ah loo khiyaanno Dowadda waa dembi.
- Dowladda waxaa ay leedahay siyaabo badan oo ay ku oggaanayso waxqabadyada u hoggaansamid-la'aanta iyo been-abuurka.
- Cawaaqibta ay leeyihiin in si been-abuur ah loo sheegto caawinnada bilaashka ah ee daryeelka ilmaha waxaa ay noqon karaan kuwo ba'an waxaanna ka mid noqon kara joojinta ama baajinta oggolaanshaha adeegga iyo bixiyaha, qanaaxyo iyo/ama xabsi dhigid.

Daraasado Xaaladeed

This brochure has been produced in 11 languages: Amharic, Arabic, Assyrian, Dari, Dinka, French, Hazaragi, Nuer, Somali, Sudanese, and Swahili. To find the brochure in your language please go to **www.fdcsupport.org.au**

Ka-warbixinta saacado in la bixiyay Daryeelka Maalintii ee Qoyska ayada oo dibadda la jirro

Adeegga Daryeelka Maalintii ee Qoyska ayaa soo gudbiyay warbixinnada kulammada Nidaamka Kaalmada Daryeelka Ilmaha ee 11 barayaal ayaga oo dibadaha jirra. Ayaga oo dibadaha jira barayaasha waxaa ay sii wadeen in ay bixiyaan warbixinnada imaanshaha ee Adeegooda Daryeelka Maalintii ee Qoyska sida in ay bixinayeen daryeelka ilmaha oo kale. Adeegga Daryeelka Maalintii ee Qoyska waxaa uu mas'uul ka ahaa saxnaanta warbixinnada imaanshaha. Waaxda Socdaalka iyo Ilaalinta Xudduudaha waxaa ay xog la wadaagtaa hay'adaha kale. Xogtan waxaa ay muujisay goorta ay barayaasha baxeen iyo marka ay dib ugu soo noqdeen dalka Oostireeliya. Caddeynta, oo ay la socdaan xogta Nidaamka Kaalmada Daryeelka Ilmaha oo xaqiijinaysa in daryeel lasoo sheegay, ayaa waxaa loo dhiibay Booliiska Federaalka ee Oostireeliya.

Cawaaqibta: Adeegga Daryeelka Maalintii ee Qoyska, ee ka mas'uulka ahaa xaqiijinta xogta la gudbiyay in ay sax tahay, ayaa la ciqaabay waxaanna la baajiyay oggolaanshaha adeegga si waafaqsan Sharciga Caawinta Qoyska. Adeega waa la xiray. Barayaasha waxaa baaray Booliiska Federaalka Oostireeliya waxaanna lagu helay khiyaanno.

Adeegga Daryeelka Maalintii ee Qoyska kaasi oo 'ilmo is-dhaafsi' ay ka dhacdey

Ka-dib marka 'ilmo is-dhaafsiga' uu dembi noqoday, tiro barayaal ah oo ka shaqeeya adeegga Daryeelka Maalintii ee Qoyska ayaa sii waday in ay sameeyaan. Waaxda Waxbarashada iyo Tababarka ayaa lasoo xiriirtay adeegga waxaa ayna ka codsatay in ay bixiso diiwaankeeda iyo dokumeentiyo muujinaya in 'ilmo is-dhaafsi' uu dhacayay ayada oo la raacayo ka-reebnaanta la oggolyahay ee waafaqsan Sharciga Caawinta Qoyska.

Cawaaqibta: Waqti dheer kuma qaadan Waaxda Waxbarashada iyo Tababarka in ay oggaato in dokumeentiyada uu adeegga bixiyay in ay muujiyaan in ay jebinayeen Sharciga Caawinta Qoyska. Adeegga waa la ganaaxay waxaanna la baajiyay oggolaanshahiisa. Maadaama adeegga uu sharciga jebiyay ayada oo si sharci-darro ah 'ilmaha la isku-dhaafsaday', arrinta waxaa loo gudbiyay Booliiska Federaalka ee Oostireeliya.

Inta badan gaadiidka

Baraha Daryeelka Maalintii ee Qoyska ayaa cunug iskuulka ka soo qaada maalin kasta marka ay saacadu tahay 3.30 pm wuxuunna ka-dib cunuga geeyaa gurigiisa marka ay saacaddu tahay 4.15 pm. Baraha waxa uu ugu qoraa waqtiyadan warbixinta imaanshaha sida daryeel cunuga la siiyay . Adeegga Daryeelka Maalintii ee Qoyska ayaa soo gudbiyay warbixinnada kulammada Nidaamka Kaalmada Daryeelka Ilmaha ee loogu talogalay cunugan.

Cawaaqibta: Adeegga Daryeelka Maalintii ee Qoyska waa in uusan soo gudbin daryeelka inta badan ah gaadiid. Marka adeegga uu u soo gudbiyay xogtan daryeel ahaan waxaa ay jebiyeen shuruudaha oggolaanshaha sii socota. Ka gaabinta in loo hoggaansamo xeerkan ayaa waxa ay keentay in si degdeg ah loo joojiyo oggolaanshaha adeegga ee waafaqsan Sharciga Caawinta Qoyska.

Xusuusnoow: *Tani ma saameynayso qabanqaabooyinka ka midka ah bixinta gaadiidka carruurta sida qayb ka mid ah bixinta daryeelka ilmaha. Tani waa, in gaadiidka uu keliya qayb ka yahay kulanka daryeelka ilmaha oo aan loo baahnayn in uu noqdo dhammaan ama inta badan kulanka daryeelka.*

Daryeelka Qaraabada

Baraha Daryeelka Maalintii ee Qoyska ee furan afar maalmood toddobaadkii oo waa in lagu daryeelo laba carruur oo aan qaraabo ahayn oo da'doodu ay ka yar tahay da'da iskuulka kuwaas oo si joogto ah u imaada afar maalmood toddobaadkii. Baraha waxa ay sii daryeeshay gabar ay walaasheeda dhashay oo afar sano jir ah iyo hal wiil oo ay walaasheeda dhashay oo hal sano jir ah laba maalmood toddobaadkii. Tani waxaa ay la mid tahay saamigal gaarayo boqolkiiba 50 daryeelka la siiyay qaraabada laba toddobaad gudahooda. Tani waxaa loola jeedaa in baraha ay dhaaftay saamigalka cusub oo ka yar boqolkiiba 50 ee daryeelka la siiyay qaraabada laba toddobaad gudahooda.

Cawaaqibta: Cawaaqibta: Adeegga Daryeelka Maalintii ee Qoyska waxaa uu jebiyay shuruudaha oggolaanshaha sii socday isaga oo aan hubinin in wax ka yar boqolkiiba 50 ee carruurta la daryeelayo labada toddobaad gudahooda in ay qaraabo yihiin baraha. Tani waxaa ka dhashey in la joojiyo oggolaanshaha adeegga ee waafaqsan Sharciga Caawinta Qoyska. Baraha waxaa loo baahnaa in ay daryeesho ugu yaraan hal cunug kale oo aan qaraabo-la ahayn ugu yaraan hal maalin ee labada toddobaad ee la sheegay si ay u sii wado daryeelka ay siiso wiilka iyo gabadha walaasheeda dhashey.

Nofeembar 2018

Amharic በራስዎ ቋንቋ በራሪ ወረቀት ለማግኘት **www.fdcsupport.org.au**. ድረ ገጽን ይመልከቱ

Arabic لإيجاد الكتيب بلغتك، يُرجى تصفح موقع الويب **www.fdcsupport.org.au**.

Assyrian ܠܡܫܟܚܘܣܐ ܦܢܩܐ ܒܠܫܢܐ ܕܝܠܘܟܘܢ، ܒܥܝܐ ܣܘܪ ܕܘܟܐ ܕܣܦܪܘܬܐ ܠܒܝܬܐ **www.fdcsupport.org.au**.

Dari برای دریافت جزوه به زبان خودتان، لطفاً به ویبسایت **www.fdcsupport.org.au** مراجعه کنید.

Dinka Të kɔɔr yin kitap në thoŋdu kitam tɔ̈ wëlthin ke yin lɔ në **www.fdcsupport.org.au**.

French Pour trouver la brochure dans votre langue, veuillez visiter le site **www.fdcsupport.org.au**.

Nuer Kɛ ɣöö bi ŋäc jiek rɛy warɛgakä/ kiɛ majalɛ kɛ thuok du, göa ɛ ɛn ɣöö bi wä kä **www.fdcsupport.org.au**.

Hazaragi برای دریافت این بروشور به زبان خود تان، لطفاً به ویب سایت **www.fdcsupport.org.au** مراجعه کنید.

Somali Si aad ugu heshid buugyaraha luuqadaada fadlan booqo **www.fdcsupport.org.au**.

Sudanese لإيجاد الكتيب بلغتك، الرجاء تصفح موقع **www.fdcsupport.org.au**.

Swahili Ili kupata brosha hiyo kwa lugha yako tafadhali tembelea tovuti **www.fdcsupport.org.au**.

Find out more by going to:

- **www.education.gov.au/child-care-provider-handbook-0**
- **www.education.gov.au/compliance**
- **www.education.gov.au/child-care-providers**
- **www.fdcsupport.org.au**
- **www.fdca.com.au**
- **www.acecqa.gov.au**

Or by going to the website of your Family Day Care service or to other information they have provided you such as handbooks or induction manuals.

Australian Government
Department of Education and Training

NSW FAMILY DAY CARE ASSOCIATION INC.
since 1976